

Nalka Magaalada Seattle (Seattle City Light) Wargeyska Macaamiisha Light Reading Janaayo-Febraayo 2010

Khidmadaha City Light

Nofeembertii la soo dhaafay, Gudiga Magaalada Seattle waxay u codeyeen in khidmadaha City Light lagu kordhiyo boqolkiiba 13.8. Isbedelka wuxuu hirgeli doonaa bisha Janaayo, 2010. Marka leysku celceliyo, macaamilka daggan guryaha, xisaabta lagu daray waxay biilkaada ku dartaa ku dhawaad \$6 bishii.

Inkastoo tan ay ahayd go'aan adag, waxay badbaadin doontaa dagganaashada maaliyadda City Light waxayna hagaajin doontaa siistemka koranta da'da ah.

Isku habeeynta khidmadda waxay kaloo la macno tahay in City Light sii wadi karto in ay bixiso barnaamijyada keydka ee macaamiisha siiya siyaabo ay ku yareyaan isticmaalkooda quwadda. Maqaalkaan Light Reading, waxaan ku soo darnay siyaabaha lagu dhaqaaleysto marka la keydsado.

Xattaa isbedelkaan ku dhacay khidmadaha, Seattle waxay ku sii socon doontaa in ay bixiso khidmadaha ugu hooseeyo marka la barbar dhigo magaalooyinka waweyn ee Mareykanka, iyo qaar ka mid ah khidmadaha ugu hooseeyo gobolken.

Deynta hagaajinta Guriga

Gurigaada ma wuxuu leeyahay fiilooyinka korantada aan amaanka ahayn? Ma leedahay qalab aan si wanaagsan u shaqeeynin ama khatar ah? Ka hortagga cimilada aan ku filneyn? Xafiifiska Guriyeynta Seattle waxay leedahay barnaamijka Deynta Hagaajinta Guriga kaasoo bixiya deynta aan korsaarka la soconin lana siiyo milkiileyaasha guryaha Seattle, kuwa u qalma, ee dakhliga yar ama dhexdhexaadka ah xagga dayactirka. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, e-mail u dir homewise@seattle.gov ama wac 206.684.0244.

Dhaqaaleyso lacag adiga oo dib u cusboneysiya qaboojiyaha iyo talaajoyinkii duugga ah.

Qaado \$30 lacagta kuu soo noqota iyo xamaalka lacag la'aanta ah ee lagu qaado qaboojiyaha ama talaajada dheeraadka kugu ah, xatta haddii ay shaqeeyaan, balse ay duug yihiin – taasoo yareeysa biilkaaga korontada boqolkiiba 10 ama ka badan. Qaboojiyeyaasha duugga ah waxay isticmaalaan quwad badan marka la barbar dhigo qalabka cusub. Si aad uga qeyb qaadatid barnamijkaan dib u cusboneysiinta, booqo boggaan internetka: www.seattle.gov/refrigerator ama wac 206.233.2653.

Yaree "bahalada" quwadda

Sanduuqyada yaryar ee madmadow ee loo adeegsado buuxinta kamerada, telefoonka gacanta, alaabta carruurta ku cayaarto iyo qalabka waxaa lagu magacaabaa bahalada quwadda maxaa yeelay waxay isticmaalaan quwad xattaa marka waxba aan la gelinin buuxiyaha. Guriga dhexdhexaadka ah wuxuu sannadkii sidaan ku khasariyaa qiyaas ahaan \$57. Si lacag kuugu baaqato, geli buuxiyeyaashaada korontada derbiga kaddibna adeegso shidaha korontada si aad u damisid marka aadan waxba buuxinin. In badan ka ogaaw www.seattle.gov/light/conserv ama wac 206.684.3800

Dhaqaleyso CFLda, kaddibna dib u isticmaal

Nalalka floroshenka (CFLs) aruursan ee Energy Star® waxay isticmaalaan hal rubac quwadda waxayna cimri ahaan gaaran 10 jeer marka la barbar dhigo nalalka kuusan. Dukaamada ka raadi calaamadaha City Light “Twist & Save” si aad gurigaada ugu heshid dhimista CFLada. Nalalka kuusan waxaa ku jira qiyaasta in yar oo merkuri ah marka waxaa muhiim ah in iyaga dib loo isticmaalo. Dib u isticmaal CFLada adiga kana sameeyso Bartell Drug, Home Depot ama meelaha McLendon’s Hardware. In badan ka baro bogga internetka: www.seattle.gov/twistandsave ama wac 206.684.3800.

Shaqada City Light

Kooxaha shaqaalaha waxay u shaqeyaan si loo hubsado in aad adiga yeelatid adeeg leysku haleyn karo, waxaana ka mid ah xaafadaha: 1st Ave. S. to Occidental Ave. S., laga bilaabo Railroad Way ilaa King St., iyo Capitol Hill. Waxaad in badan oo ku saabsan mashariicda dhismahena ka akhrisan kartaa internetka: www.seattle.gov/light/const_mgmt

Xisaabtaada City Light

Waxaad biilkaada korontada ka bixin kartaa internetka. Si aad isugu qortid, tag www.seattle.gov/light kaddibna riix meesha lagala xariiro “electronic billing” (biilasha lagu bixiyo elataroonikada), ama wac 206.684.3000.

Haddii aad sanooyin lahayd xisaabta City Light, waxaa dhici karto in aanan haaysanin macluumaadka iminka jira. In badan oo ka mid ah macaamiishena waxay isticmaalaan telefoonada gacanta, waxaana dhici karto in nambarkaas uusan ku jirin siistemkena. Fadlan xisaabtaada ka casriyeyso internetka www.seattle.gov/light/accounts ama wac 206.684.3000. Marna lama qeybiyo macluumaadkaada shakhsiga.

Maxaa la semeyaa haddii nalalka damaan

Isku qaado qalabkaada nolosha si aad isugu diyaarisid marka quwadda baxdo iyo marka lala kulmo degdegyada kale. Sida loo sameeyo taa ka ogaaw www.takewinterbystorm.org.

Barnaamijka Qalabka Taageerada Nolosha ee City Light

Macaamiisha ku tiirsan qalabka taageerada nolosha ee korantada ku shaqeeyo waa in ay la xariiraan City Light maxaa yeelay waxaan iyaga u haayna barnaamij. Barnaamijka wuxuu noo ogol yahay anaga in aan ogaano meelaha ay ku nool yahiiin macaamiishaan; wuxuu macaamiisha ku kaalmeeyaa in ay isu diyaariyaan marka korantada baxdo; iyo waxay siisaa macluumaad ku saabsan sida loola xariiro danabka marka korontada baxdo. Bogga internetka kala soo bax foomka diiwaan gelinta (isku qorista waxay u baahan tahay shahaadada taqtarka) www.seattle.gov/light/Accounts/LifeSupport ama wac 206.684.3020

Seattle City Light

700 Fifth Avenue, Suite 3200PO Box 34023

Seattle, WA 98124-4023

www.seattle.gov/light

Su’aalaha, faalada ama soo jeedinta? E-mail u dir respond.scl@seattle.gov ama wac 206.684.3000.

Wargeyskaan waxaa lagu heli karaa qaab kale marka la codsado. Ooraalka Isbanishka, Fietnamka, Shiinaha, Soomaaliga, Tagalogga iyo Koreanka waxaa laga heli karaa internetka ama wac 206.684.3000.